JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |



# XEERKA HAWL-GABKA IYO XAQSIINTA CIIDAMADA QARANKA JSL
# XEER LR.88/2019


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-435/122019 Taar: 23/12/2019

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Hawl-gabka iyo Xaq-siinta Ciidammada Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr.88/2019

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-41/852/2019, ee ku taariikheysan 12/12/2019, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Hawl-gabka iyo Xaq-siinta Ciidammada Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr.88/2019;

**Waxaan soo-saaray;**

**Dhaqan-galka Xeerka Hawl-gabka iyo Xaq-siinta Ciidammada Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr.88/2019.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
Head Quarter Hargeisa.

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha wakiilada**
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-41/852/2019
Date: 11/12/2019.

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka**
**Xeer Lr.88/2019**

**Golaha Wakiiladu**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay: -** | Qodobada 24aad, 53aad, 76aad, 77aad, 123aad iyo 124aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland |
| **Markuu Tixgaliyay:-** | Baahida loo qabo in la dejiyo nidaamka xaqsiinta iyo Hawlgabka dhamaan xubnaha ciidamada Qaranka Jamhuuriyada Somaliland. |
| **Markuu ka Duulay:-** | In Ciidamada kala duwan ee Qaranka JSL helaan xaqa hawlgabka iyo xaqsiintooda. |
| **Markii ay muhiim noqotay:-** | In la helo xeer habaynaya xaqsiinta Ciidamada iyo hawl-gabkooda. |

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:-** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:88/2019** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **12/11/2019.** |
| **Markuu Arkay:-** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:88/2019** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhsanayd **08/12/2019.** |
| **Markuu Arkay:-** | In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameynin kuna ansixiyeen laba iyo konton **(52)** cod **Xeerka Hawlgabka iyo xaqsiinta Ciidamada Qaranka LR:88/2019** |

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah soddon iyo todoba mudane **(37cod)** oo gacantaag ah ku Ansixiyay Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka **Xeer Lr.88/2019** .

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JS

Baashe Maxamed Faarax
GuddoomiyahaeeGolahaWakiilada JSL.

JAMHUURIYADA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILADDU

**Markuu Arkay: -** Qodobada 24aad, 53aad, 76aad, 77aad, 123aad iyo 124aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Tixgaliyay: -** Baahida loo qabo in la dejiyo nidaamka xaqsiinta iyo Hawlgabka dhamaan xubnaha ciidamada Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu ka duulay: -** In Ciidamada kala ee Qaranka JSL helaan xaqa hawlgabka iyo xaqsiintooda.

**Markii ay muhiim noqotay: -** In la helo xeer habaynaya xaqsiinta Ciidamada iyo hawl-gabkooda.

## Wuxuu Ansixiyay

## Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamda Qaranka

## Xeer Lr. 88/2019

QAYBTA KOWAAD
TILMAAMAHA GUUD

Qodobka 1aad
Magaca xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka JSL Xeer Lr. 88/2019

Qodobka 2aad
Erey-bixinta

Erayadan soo socda waxa loola jeeda sidan hoos ku qoran, hadii aanu nuxurku si kale u tilmaamayn: -

| | |
|---|---|
| **"Sarreeye"** | Waxaa loolla jeedaa Sarreeye Guuto, Sarreeye Gaas iyo Sarreeye Guud |
| **"Sarkaal"** | Waxaa loolla jeedaa Xiddigle ilaa Gashaanle Sare |
| **"Sarkaal xigeen** | Waxaa loolla jeedaa Laba Alifle ilaa Saddexle ama KS |
| "Dabley" | Waxaa loolla jeedaa Dable ilaa Alifle |
| **"Saldhig mushahar"** | Waxaa loolla jeedaa Mushahar Bileedka aan Gunno Lahayn |
| **"Guddi Caafimaad"** | Waxaa loolla jeedaa Dhakhaatiirta hubinaysa Caafimaadka xubinta hawlgabka gelaysa |
| **"Liiltir"** | Waxaa loolla jeedaa Dable ilaa Alifle Lacagta Dhigaalka ah ee Laga gooyo |
| **"Haya'dda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada"** | Waxaa loolla jeedaa haya'adda hubinaysa wax ku oolnimada iyo Hawlgabka iyo Xaqsiinta, |
| **"Rusqayn"** | Waxaa loolla jeedaa shaqo ka tegis |
| **"Fasax aan caadi ahayn"** | Waxa loolla jeedaa fasax sabab ku yimi oo aan ka mid ahayn fasaxyada qaranka. |
| **"Hawl-gab"** | Waxaa loolla jeeda Xubin gaadhay da'dda shaqo-ka-Fadhiisiga sida ku qeexan Xeerkan Gudihiisa. |
| **"Xuquuqda Hawlgabka"** | Waxaa loolla jeedaa Xuquuqda uu yeelanayo qofka hawlgabka gelaya |

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

| | |
|---|---|
| **"Xuquuq Bixin"** | Waxaa loolla jeedaa Xaqa u yeelanayo qofka gaadhay Hawlgabka/xaqsiinta |
| **"Ciidanka Qaranka"** | Waxaa loolla jeedaa Ciidamadda kala duwan ee qaranka |
| **"ku Noqosho shaqo"** | Waxaa loolla jeedaa Xubin Ruqsaysatay oo ku soo Noqotay Shaqadii |
| **"Xeer-nidaamiye"** | Xeer ka dheegmaya Xeerkan oo Qeexaya Hawlgabka iyo Xaqsiinta |
| **"Xaqsiin"** | waxaa loolla jeedaa Xubinta shaqada ka tagta iyadoon gaadhin da'dii hawl-gabka xaqa loo siiyo mudadii uu shaqaynayay. |

## Qodobka 3aad
## Adeegsiga Xeerka

1. Xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha ka dhasha waxa lagu maamulayaa dhammaan arrimaha la xidhiidha xuquuqda hawl-gabka iyo xaqsiinta Ciidamada Jamhuuriyadda Somaliland oo kala ah, Ciidanka Qaranka, Booliska iyo Asluubta, ee ku aas-aasan Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobbadiisa 123aad iyo 124aad.
2. Xeerkan waxaa kale oo lagu dabaqayaa Hay'adda Sirdoonka Qaranka iyadoo loo raacayo, Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer LR. 59/2013.
3. Sidoo kale waxaa xeerkan lagu dabaqayaa Ciidamada kale ee qaranka kuwaasi oo kala ah (Ciidanka Socdaalka, Ciidanka Ilaalada Xeebaha iyo Ciidanka Dab-damiska).

## Qodobka 4aad
## Haya'dda Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidamada Qaranka JSL

1. Hay'adda Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidamada Qalabka sida waxa soo magacaabaya Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somaliland iyada oo qaadaysa masuuliyadda, hubinta wax ku oolnimada iyo maamulida gunnooyinka Hawlgabka iyo Xaqsiinta, iyada oo la waafajinayo xeerkan Hawlgabka Iyo Xaqsiinta Ciidamada Qalabka sida.
2. Haya'dda Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidamada Qaranka waxay xaqsiinta iyo hawl-gabka u raacaysaa Xeerkan iyo Xeer-nidaamiyayaasha ka dheegma.

## Qodobka 5aad
## Ujeedada Xeerka

Ujeedadda xeerkan laga leeyahay waa in la-dejiyo nidaamka xaqsiinta iyo Hawl-gabka dhamaan Xubnaha ciidamada Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 6aad
## Qadarka Iyo Mutaysiga Hawl-Gabka Iyo Xaqsiinta

1. Xuquuqda Hawl-gabka waxa yeelanaya xubnaha Ciidamada Qaranka ee kala ah saraakiil iyo saraakiil xigeen, oo muddada shaqadoodada xidhiidhsani gaadho 20 Sanno iyo wixii ka badan. Hawlgabka la siinayaa kama badan karo celceliska saldhigga mushaharka 80%, alifley iyo dableyduna marka muddada xidhiidhsani ee shaqadooda Ciidannimo ka badan tahay 10 Sanno, kana hoosayso



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

muddada Hawlgabka Waxaa xaq ahaan loo siinayaa sannad kasta oo loogu dhufto saldhigga bil mushaharkeed.

2. Hawl-gabka iyo Xaqsiinta qodobkan ku tilmaaman waxaa laga soo bilaabayaa aasaaskii Ciidanka Somaliland Waxaa kale oo loo tixgelinayaa xuquuqdan xubnaha ciidamada Qaranka ee shaki la'aan ay cadaato muddada ay shaqadan hayeen waqtigii maamuladii kala danbeeyay ilaa dawladii Ingiriiska.

### Qodobka 7aad
### Asbaabaha Joojiya Hawl-gabka Iyo Xaqsiinta

1. Xubnaha Ciidamada Jamhuuriyadda Somaliland ma yeelan doonan xuquuq hawl-gab iyo xaqsiin haddii uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo ciqaab ah.
2. Xubinta Ciidan ee xukun maxkamadeed ka joojiyay xuquuqda Hawl-gabka iyo xaqsiinta waxa la siinayaa lacagtii Hawl-gabka iyo xaqsiinta looga jarayey. (Liiltir)

### Qodobka 8aad
### Ruqsayn

1. Xubnaha Ciidamada Qaranka ee ku tilmaaman qodobka 5aad Farqadiisa 1aad, marka ay iskood ugu ruqsaystaan shaqada ciidamada.

B) Waxa loo oggolaanayaa Hawl-gabka muddada shaqadiisu gaadho 20 Sanno ama ka badan.

T) Xubinta Shaqaynaysay 10 Sanno ama ka badan ee aan gaadhin wakhtigii Hawl-gabka waxa la siinayaa xaq, iyadoo sanad walba loogu dhufanayo saldhiga bil mushaharkeed.

J) Marka xubinta Ciidan ee iskeed u ruqsaysataa ka mid tahay xubnaha ku tilmaaman qodobka 6aad farqadiisa 3aad waxa la siinayaa xaq marka muddadiisa shaqo gaadho 10 Sanno ama ka badan.

### Qodobka 9aad
### Ku Noqoshada Shaqada

Marka xubin ciidan oo shaqada ka ruqsaysatay ku soo noqoto shaqada sanad gudihii waxaa loo tirinayaa sanadihii xidhiidhsanaa ee muddada shaqada, haddiise uu xaquuqdiisa qaatay mudada shaqadu bilow bay noqonaysaa.

### Qodobka 10aad
### Fasax Sabab Xanuun

Muddada xidhiidhsan ee shaqada waa loogu darayaa Hawl-gabka iyo xaqsiinta wakhtiga ay ku jiraan fasaxa xanuun ee dhaawaca, ama xanuunka aanu xilkiisa u gudan Karin iyo sii haynta shaqada ciidanka.

### Qodobka 11aad
### Fasaxa Aan Caadi Ahayn

Fasaxa aan caadiga ahayn lagu tirin maayo muddada xuquuqda Hawl-gabka iyo xaqasiinta xubnaha ciidamada Qaranka, ee ku jira fasaxa lacag la'aan ama dan shaqsi ah.

## QAYBTA LABAAD

### Qodobka 12aad
### Xuquuqda Hawl-gabka Iyo Xaqsiinta

Iyadoo loo eegayo xaaladaha caadiga ah waxa la bixin doona xuquuqdan hawlgabka iyo xaqsiinta:

| Darajada | Wakhtiga uu shaqnayay | Halwgabka iyo Xuquuqda Xaqsiinta |
| --- | --- | --- |
| Darajooyinka oo dhan | Wixii ka Yar 10 sanno | Xaqsiin ah bil mushaharkiisa oo lagu dhuftay inta sanno ee uu shaqaynayay kama yaraan karo bil mushaharkii. |
| Darajooyinka oo dhan | 10 ilaa19 sanno | Xaqsiin 1 bil mushaharkeed oo lagu dhuftay inta sanno ee uu shaqaynayay. |
| Dabley iyo Alifley | 20 sanno iyo Wixii kabadan | |
| Saraakiil iyo Sarkaal Xigeen | 21 ilaa 24 sanno | Hawlgab bille ah oo 40% saldhigga mushaharkiisa. |
| | 25 ilaa 29 sanno | Hawlgab bille ah oo 50% saldhigga mushaharkiisa. |
| | 30 ilaa 39 sanno | Hawlgab bille ah oo 60% saldhigga mushaharkiisa. |
| | Wixii ka badan 40 sanno | Hawl-gab bille ah oo 70% saldhigga mushaharkiisa. |

## Qodobka 13aad
## Da'da Hawl-gabka

1. Iyadoo loo eegayo xaaladaha caadiga ah, xubnaha Ciidamada Qalabka sida waa in ay kaga faadhiistaan Ragu Da'ahan sidan soo socota.

| Darajadda | Da'da |
| --- | --- |
| Dable, Alifle, Laba Alifle iyo Saddex Alifle | 60 Sanno |
| Midle, Labaale, Saddexle (Kk, KL, KS) | 60 Sanno |
| Xiddigle, Laba xiddigle, Dhamme | 60 Sanno |
| Gaashaanle, Gaashaanle Dhexe iyo Gaashaanle Sare | 65 Sanno |
| Sarreeye Guuto, Sarreeye Gaas iyo Sarreeye Guud | 65 Sanno |

b) Hawl-gabka waxa looga soo tirinaya tariikhda xubinta shaqada la qoray.

t) Xubintii aan aqoon gaar ah oo uu leeyahay looga maarmi karin waa loo deynayaa shaqada hadii aanu isagu codsan inuu shaqada ka fadhiisto.

2. Iyadoo loo eegayo xaaladaha caadiga ah, xubnaha Ciidamada Qaranka sida waa in ay kaga faadhiistaan Dumarku Da'ahan sidan soo socota.

| Darajadda | Da'da |
| --- | --- |
| Dable, Alifle, Laba Alifle iyo Saddex Alifle | 50 Sanno |
| Midle, Labaale, Saddexle (Kk, KL, KS) | 50 Sanno |
| Xiddigle, Laba xiddigle, Dhamme | 50 Sanno |
| Gaashaanle, Gaashaanle Dhexe iyo Gaashaanle Sare | 55 Sanno |
| Sarreeye Guuto, Sarreeye Gaas iyo Sarreeye Guud | 55 Sanno |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

b) Hawl-gabka waxa loo eegayaa tariikhda xubinta shaqada la qoray

t) Xubintii aan aqoon gaar ah oo uu leeyahay looga maarmi karin waa loo deynayaa shaqada hadii aanay iyadu codsan inay shaqada ka fadhiisto

## Qodobka 14aad
## Xubnaha Naafada

Xubnaha ku naafooba, xanuunsada ama ku dhaawacma shaqada ciidanka:

1) Waxaa lagu hawlgab siinayaa sida soo socota:
   a. 70% saldhigga mushaharkiisa haddii uu shaqeeyay 20 sanno iyo ka badan.
   b. 50% saldhigga mushaharkiisa haddii uu shaqeeyay 20 sanno iyo yar.
2) Waxaa hawlgabka loogu darayaa kordhin sida soo socoto ah:
   c. 10% saldhigga mushaharkiisa haddii uu yahay naafo fudud.
   d. 25% saldhigga mushaharkiisa haddii uu yahay naafo culus.
   e. 50% saldhigga musharkiisa haddii uu yahay naafo aad u culus.
3) Hawlgabka ugu sarreeyaa marka lagu daro xaqa naafada ma dhaafi karo 85%.
4) Cadaynta naafanimada waxa cadaynaya guddi caafimaad oo Qaran.

## Qodobka 15aad
## Hawlgabka Ku Yimid Sabab Maamul

Xubinkasta oo hore uga fadhiisata shaqada ee adeega ciidanka sababo maamul daraadeed sida anshax, awood la'aan, codsi shakhsi ama sababo kale oo aan caafimaad ahayn, wuxuu helayaaa hawlgabkii iyo Xaqiisii caadiga ahaa ee uu mutaystay.

## Qodobka 16aad
## Dhaxalka Xubinta Ciidan ee ay ku Timaaddo Geeri Caadi ah

Xubinta ciidan ee ay ku timaaddo geeri caadi ahi waxa la siinayaa ehelkiisa dhaxalka leh:

1. Lacag u dhiganta saldhiga bil mushaharkeed oo loogu dhuftay sanadihii uu shaqaynayey oo loogu daro liiltirkii laga jari jiray bil kasta.
2. Hadii uu caruur ka tegay waxaa xannaano ahaan loo siinyaa bil kasta 80% saldhigga mushaharkiisa ilaa ka u yar uu gaadhayo 15 Sano.

## Qodobka 17aad
## Joojinta, Waayidda, iyo Hakinta Xuquuqda Hawlgabka

1. Dhimashada xubinta ciidan ee hawlgabka, Dhaxlayaashiisa waxa loo qaybinayaa lacag hal mar ah 30 bilood hawlgabkiisii, ka dibna wuu joogsanayaa hawlgabku.
2. Hadii xubintu uu lahaa caruur da'adoodu ka yar tahay 15 sanno, waxay helayaan 80% hawlgabkiisii waxa helaya Xaaskiisa ama Xaasaskiisa kor lagu soo xusay ilaa inta uu ka gaadhayo ilmaha ugu yar 15 sanno, Kadibna hawlgabku wuu joogsanayaa.
3. Xubinta ciidan ee uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo aan ka baabi'in xuquuqda ciidanimo waxa laga hakinayaa xuquuqda hawlgabka iyo xaqsiinta mudada uu xabsiga ku jiro



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 18aad
## Lacag Haynta ama Weecinta Xaqsiinta iyo Lacagta Hawl-gabka

Gunnada Xaqsiinta iyo Hawlgabka way ka goyn kartaa ama leexin kartaa Haya'da Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qalabka sida, qofka qaataha ah iyada oo loo raacayo sharciga rasmiga ah hadii ay maxkamadi xukunto, sida dib u bixinta daymaha ama Xaqsiinta dawlada ama ururo kale oo shakhsiyeed.

## Qodobka 19aad
## Dhaxalka

1. Xubinta Ciidan ee ku dhinta isagoo ka hor tegaya khatar dagaal, denbi, iyo masiibo dabiici ah waxaa ehelkiisa dhaxalka leh la siinayaa:

    B. Lacag u dhiganta saldhigga bil mushaharkeed oo loogu dhuftay sannadihii uu shaqaynayey iyo korodhsiimo 30 bilood ah saldhigga mushaharkiisa.

    T. Hadii uu ubad ka tegay ilaa ka u yar da'diisu gaadhayso 15 sanno, waxaa si gaar ah loogu xannaanaynayaa in la siiyo Lacag u dhiganta 80% saldhigga mushaharkiisa bil kasta.

    J. Xannaanada Caruurta looma leexin karo cid kale.

## Qodobka 20aad
## Cabashooyinka

Cabashooyinka ka yimaadda qoondaynta, weecinta, hakinta ama joojinta lacagta xaqsiinta iyo hawlgabka waxaa loo gudbinayaa Hay'adda xaqsiinta Ciidamada Qaranka, Haddii uu intaas ku qanci waayo wixii cabashooyin dhaafsan Haya'adda xaqsiinta waxaa loo gudbinayaa maxkamadaha awooda u leh ee rayidka ah.

## Qodobka 21aad
## Is-beddelka Xaaladeed

1. Xubnaha hawlgabka ah ee helay lacagta hawlgabka ah ee Dhigaalka Ciidamada Qalabka sida, ama dhaxlayaashiisa kolba sida ay tahay, waxaa laga rabaa inay wargeliyaan Haya'da Hawlgabka Ciidamada Qaranka iyada oo aanay dib u dhac jirin, wax kasta oo is beddel ku keenaya duruufaha lacagta hawlgabka ciidanka. Waxaa ka mid ah, sida macluumaadka xidhiidheed, macluumaadka lacag dhigashada iyo lacag bixinta, xabsi gal, geeri, is beddelka xaaladda (guur, dalaaq, geerida xaaska), is bedel xaaladda carruurta (dhalasho, dhimasho), iwm.
2. Hay'adda Xaqsiinta iyo Hawlgabka waxay si xilliyeed ah u xaqiijinaya duruufaha xubnaha hawlgabka ah iyo qaadashada lacagta hawlgabkasi loo xaqiijiyo lacagaha saxda ah ee la bixiyey.

## Qodobka 22aad
## Abuuritaanka Sanduuqa Dhaqaalaha Hawl-gabka Iyo Xaqsiinta

1. Dhammaan xubnaha Ciidamada Qaranka waxaa si joogto ah looga jarayaa mushaharkooda bil kasta lacag dhigaal ah oo lagu shubo sanduuqa hawlagabka iyo xaqsiinta ciidamada, taasoo looga kala goyn doono sida hoos ku qeexan: -

    B. 2.5% laga jaro saldhigga mushaharka Alifley iyo dableyda.

    T. 5% laga jaro saldhigga mushaharka saraakiisha iyo S/xigeenka.

    J. 7% Laga jarayo duliyayaasha, Ciidamada dalaayadaha iyo Ciidamada Danabka (Kamaandows).



XAFISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Waxay wasaarada maaliyadu bil kasta si joogto ah ugu biirinaysaa sanduuqa xaddi lacag dhan 50% lacagtii laga soo jaray ciidamada.
3. Xisaabta socota ee Sanduuqa xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka qaranka ee ka furan Banka dhexe ee Jamhuuriyada Somaliland ayaa lagu ururinayaa lacag bileedka ku qeexan farqada 1aad iyo 2aad ee qodobkan.
4. Hay'adda xaqsiinta iyo hawl-gabka Ciidamada ayaa maamuli doonta sanduuqan iyadoo raacaysa nidaamka xeerkani tilmaamayo: -

   B. Lacagata ku jirta Sanduuqa Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qaranka looma leexin karo sifo kale oo aan ahayn hawlgabka iyo xaqsiinta

## QODOBBADA DHAMMAYSTIRKA

### Qodobka 23aad
### Xeer-Nidaamiyaha Xeerkan

Wasiirka Wasaaradda Gaanshaandhiggu marka uu la-tashado Taliyayaasha Ciidanka Qaranka iyo Hay'addaha xaqsiinta, waxa uu soo sarayaa Xeer-nidaamiye lagu faah-faahinayo laguna dhaqan gelinayo xeerkan

### Qodobka 24aad
### Tirtirid

Xeerkani waxa uu nasakhayaa ama burinayaa dhammaan xeerarka ama qodobada xeer ku jira ee ka horeeyay ee hawl-gabka iyo xaqsiinta ciidammada qaranka tilmaamay.

### Qodobka 25aad
### Dhaqan galka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka ay ansixiyaan golayaasha xeer-dajintu (Wakiiladda iyo Guurtida), Madaxweynuhuna saxeexo isla markaana ku soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

Baashe Maxamed Faarax
Guddoomiyaha ee Golaha Wakiilada JSL.